



XEERARKA GUUD & HOOSE EE SHIRKADDA

(OSOBLE REAL ESTATE COMPANY)

SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADDA

(OSOBLE REAL ESTATE COMPANY)

(ARTICLE OF ASSOCIATION)

MUQDISHO -SOOMAALIYA



**UJEEDDO:DHISMO SHIRKAD MAS'UULIYADEEDU XADIDDAN TAHAY
SHAQADEEDUNA TAHAY KA GANACSIGA DHULALKA BANAAN IYO
GURYAHA, DHISIDA GURYAHA IYO QURXINTA MAGAALOOYINKA
LAGUNA MAGACAABO (OSOBLE REAL ESTATE COMPANY)**

**HANTIDEEDUNA TAHAY \$500,000 (SHAN BOQOL OO KUN OO
DOOLLARKA MAREYKANKA AH)**

Maanta oo ay taariikhdu tahay 11/09/2021 Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed (Max'ed Nootaayo)**, lehna Xafiiska Nootaayaha Tayo Public Notary ee ku yaalla Xamar, degmada H/Wadaag Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, waxaa xafiiska iigu yimid mudane:-

Dr. Saciid Cali Cosoble, Sita baasaboorka lamarkiisu yahay P00805771, kuna lifaaqan Dukumintigaan.

Mudanaha kor ku xusan isaga oo caafimaad qaba, caqligiisana taam yahay, cid heshiisnaan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, wuxuu i weediistay inaan u qoro heshiis ku saabsan dhismo sharci Shirkadeed oo ka kooban qodobada hoos ku qoran:-

Wuxuuna I waydiistay inaan u qoro heshiis ku saabsan dhismo shirkad oo uu ku cadeeyay heshiika qodobada hoos ku qoran:-

QODOBKA 1-AAD
MAGACA KAMBANIGA

Mudanaha aan kor ku soo sheegnay waxaa uu sameystay Sharci Shirkad lagu magacaabo (**OSOBLE REAL ESTATE COMPANY**) oo ah kambani gaar loo leeyahay (Private Company) shaqadeeduna tahay ka ganacsiga dhulalka banaan iyo guryaha, dhisida guryaha iyo qurxinta magaalooyinka.

QODOBKA 2-AAD

WAQTIGA LA' AASAASAY KAMBANIGA

Kambaniga (**OSOBLE REAL ESTATE COMPANY**) waxaa la'aasaasay 20-03-2021, waxaana lagu aasaasay magaalada Muqdisho caasimadda Soomaaliya.

QODOBKA 3-AAD
NOOCA KAMBANIGA

Kambanigani waa Kambani gaar loo leeyahay (sole proprietorship) waxaana ku soo biiri Kara Saamiley haddii u ogolaado Milkiilaha Kambaniga



QODOBKA 4-AAD
XARUNTA KAMBANIGA

Xarunta Kambanigu waa Muqdishu caasimadda Soomaaliya Degmada H/wadaag, Xarumaha Kambaniga waa la kordhin karaa markii loo baahdo waxaana lagala xiriiyaa Milkiilaha Kambaniga, **Dr, Saciid Cali Cosoble Mobile:+252615572999**

QODOBKA 5-AAD
UJEEDDOOYINKA SHIRKADDA

- A- Ka Ganacsiga Sida Guryaha Dhisn iyo Dhulal Banaan
- B- Qeyb Ganacsi oo ah in ay Shirkaddu iyadu Hantideeda Ku dhiso Dhismayaal ama Cid La wadaagto Qarashka Dhisida, iyadoo Dhismahaasi Ku qoran yahay Lahaanshaha shirkadda ama Cid ay La wadaagtay, Ka dibna ay Soo Ceshaneyso lacagtaydii iyadoo Ku iibineysa, Kaash ama Ku iibineysa Kiro-iib (Hire-Purchasing) si ay Lacagtaydii ugu soo Ceshato, Habka loo yaqaano Haftada (installments) arintaan Waxaa Si Cad u Qeexaya Foomka Heshiiska Shirkadda iyo Macaamiilka Loo Diyaariyey, ee Quseysa Adeega Nuucaan ah.
- C- Qayb ah, Ka Gacansiga Dhulka Sida Iibin iyo Soo iibsasho Dhulka iyo Guryahaba iyo iwm.
- D- Ganacsiga Shirkaddu Waa Mid Ku Saleysan Shareecada Islaamka, Taasoo Macnaheedu yahay in ay Ka Fogtahay Waxkasta oo Shareecada Mamnuucday, Waxaa Kale oo ay Tix galineysaa Sharciyada Ganacsiga ee u yaala Dadalka ay Ka Howl Galeeyso.
- E- Dajinta qursho iyo maareynta naqshadaha cusub ee qurxinta magaalooyinka
- F- Keydinta agabka dhismaha
- G- Galidda heshiis yada laxiiro dalabaadka badeecooyinka (Procurement of Goods and Services)
- H- Dhismaha Guryaha iyo waddooyinka Jayga ah
- I- Qaadashada qandaraasyaada dhismaha iyo biyaha.
- J- Cabirida Goofafka
- K- Shaqo u abuurida dhalinyarada Soomaaliyeed

QODOBKA 6-AAD
HANTIDA IYO RAASIMAALKA KAMBANIGA

Raasumaalka shirkaddu waa lacag dhan US \$500,000 (Shan Boqol oo kun oo doolarka Mareykanka ah) oo u kala qaybsanta 500 saami oo kiiba qiimahiisu yahay \$1,000 (Kun doolar).

No	Magaca	Saamiga	Qiimaha saamiga	Wadarta saamiga	Boqolkiiba
1.	Dr, Saciid Cali Cosoble	500	\$1,000	\$500,000	100%
	Wadarta	500	\$1,000	\$500,000	100%

QODOBKA 7-AAD
SAAMIYADA KAMBANIGA

Saamiyada Kambanigu waxay ka koobantahay 500 (SHAN BOQOL) saami oo magacaaban



QODOBKA 8-AAD
GADASHADA SAAMIGA

Marka ay kuu soo biiraan Saamile kasta waxaa uu xaq u leeyahay in uu gato saamigiisa marku rabo waana inuu u gudbiyaa Milkiilaha Kambaniga iyadoo qoraal ah, haddii looga gadan waayo muddo 90 maalmood ah, wuxuu u madax banaan yahay in uu ka gato cidduu rabo. Saamiyada waa la kordhin karaa haddii loo baahdo saamiga islamarkaana saamile kasta waxaa uu xaq uleeyahay inuu kordhin karo saamigiisa .

QODOBKA 9-AAD
QAYBSASHADA FAA'IIDADA IYO KHASAARAH

Faa'iidada iyo khasaaro wixii yimaado waxaa iska leh Milkiilaha Kambaniga **Dr, Saciid Cali Cosoble.**

QODOBKA 10-AAD
SHAKHSIYADDA QAANUUNIGA EE KAMBANIGA

Kambaniga waxaa uu leeyahay xuquuq qaanuuni ah, haddaba Magaca Kambaniga ayaa loo isticmaalayaa dhammaan hantida Kambaniga sida: gaadiidka, qalabka, dhulalka, guryaha, sumadaha ganacsiga iyo tiimbarayaasha.

QODOBKA 11-AAD
QAAB DHISMEEDKA IYO MAAMULKA KAMBANIGA

Maamulka Kambaniga wuxuu ka kooban yahay sidaan hoos ku qoran:-
Maamule Guud ahna milkiilaha Kambaniga waa **Dr, Saciid Cali Cosoble**

1. Shaqaalaha kambaniga.

QODOBKA 12-AAD
GEERI AMA WAALLI KU TIMAADDA MILKIILAH

Haddii waalli ama geeri ku timaado milkiilaha Kambaniga waxaa saamigiisa lagu wareejinayaa dhaxaltooyadiisa sharciga ah ama ciddii kale ee maxkamadu u amarto.

QODOBKA 13AAD
MUDDADA JIRITAANKA KAMBANIGA

Kambanigu waxaa uu jirayaa muddo dhan 60 sano mudada jiritaanka kambaniga wa la kordhin karaa haddii uu ogolaado milkiilaha kambaniga waana layareyn karaa

QODOBKA 14-AAD
BAABI'INTA KAMBANIGA

Waxaa uu baaba'ayaa Kambanigu marka la helo qodobada soo socdo:-

1. Dhamaanshaha muddada jiritaanka Kambaniga.
2. Go'aan baabi'in ee ka soo baxay guddiga maamulka.
3. Haddii Kambanigu uu musalafto. Islamarkaana ay u suurta gali weyso inuu shaqeeyo
4. Haddii uu soo baxo sharci baabinayo Kambaniga noocan ah.

QODOBKA 15-AAD
KALA QAYBSIGA HANTIDA KAMBANIGA

Waxa la magacaabayaa guddi farsamo oo soo aruuriya hantida Kambaniga ee deynta ku maqan iyo midda taala, isla markaasna la bixiyo xuquuqda lagu leeyahay Kambaniga iyadoo lagu saleynaayo xeerka iyo shuruuqda lagu dhiso.



QODOBKA 16-AAD**WIXII LAGA WAAYO SHARCIGA DHISMAHA KAMBANIGA.**


Wixii aan ku qornayn sharciga dhismaha Kambaniga waxaa loo raacayaa xeerka Kambaniga iyo sharciga Kambaniga ee dalka u degsan.

QODOBKA 17-AAD**DHAQAN GALKA SHARCIGA DHISMAHA**

Sharciga dhismaha wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo milkiilaha Kambaniga .

QODOBKA 18-AAD**TIRADDA BOGAGGA EE HESHIISKU KU QORAN YAHAY**

heshiiskan wuxuu ku qoranyahay af-soomaali wuxuuna ka koobanyahay 18-qodob iyo 5-bog. Heshiiskan waxaa ila saxiixay Milkiilaha Kambaniga, kadib markii uu akhristay, raalina ka noqday sida aan u qornay heshiiskan, waana kan saxiixiisa hoos ku qoran:-

Dr, Saciid Cali Cosoble	<p style="text-align: center;"><u>SAXIIX</u></p> 
-------------------------	---

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP.020/TPN/2021 Tr. 11/09/2021, Muqdisho, Aniga oo ah:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"** lehna Xafiiska Nootaayaha Tayo, Waxaan halkan ku Caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Shirkadda ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya, islamarkaana uu saxiixay milkiilaha Shirkadda Nootaayaduna waxey hubisay magaciisa in uu yahay Kii dhabta ahaa ee lahaa saxiixyadan kor ku xusan, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.

**SAXIIXA NOOTAAYAHA**

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"





FOOMKA BIXINTA SHIRKAD

REP.020_/2021

Tr, _11_/_9_/2021

Magaca qaadaha: →

D. Saaid Can Ceesak

Meeshuu deganyahay →

Hadan

Telfoonkiisa: →

06155 72 999

SAXIIXA QAADAHA:

Awisa ayee suyeen

SAXIIXA BIXIYAHA:

[Signature]